

Allow Ciiddayda Boqranay Lagaa Baddalo

Caasho Sheekh Maxamed

Illaahow boqorow baryadaada ha igu qadin
Allow samadaada oo igu beeg ballaqaan
Allow awoodd buuxda oo aan baaqaan lagu aqbalo
Allow buuggaaga sharafta leh bog lagaga qoro
Allow u bayaami sida waa baryiyo dharaar

Bulshada baas oo aan abidkeed baraarugayn
Badaawida aan indhaha biidna ka arkahayn
Bartii maqalkiyo qalbigu bayd qufulan yihiin
Bugcad la baasiyo darxumadii ku baaqigaa
Allow ciiddayda boqranay lagaa badalo
Allow bulsho garata danaheeda kugu dulbeer
Allow raga ba'ay dalkaygow lagaa baddalo
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Bireeyiyo buubiyiyo boobe iyo kufsade
Been hadlaha sheekta hadba beel inuu xukumoo
Duqowda balbalisa dabku maalintuu bakhtiyo
Kuwa bannaanada jiroo baas abuurradaa
Allow ciiddayda boqranay lagaa badalo
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Buulal diirdiirte isku haysta boqor cadliya
Beebabkiyo fiiladii qaar kaloo la baxay
Baahi ruux liitoo baryo dhowra aan wax cunin
Bireeyoo baarte waligiis aan ruuxna bixin
Allow ciiddayda boqranay lagaa badalo
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Ugaaska iyo boqorka midba buul hortaagan yahay
Malaayada buunka u afuufa beel la gubo
Magaca beel daajiyaan buuriga astawayn
Haweenka barkood oo raga ba'ay bogaadsha qaar
Allow ciiddayda boqranay lagaa badalo
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Qabiilka bah moode ka baraadla' qaran burburay
Bililiq u yaace guba buulka hooyadiis
Barbaarr lagu habay oo anfacoodu hilib dad yahay
Bayd islaameed ku jire booli shiikh daldala
Allow ciiddayda boqranay lagaa badalo
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

Jage u baalhaade aan dadnimo ku beegsan karin
Xabash bugcad u goobe Soomali bohool ku gure
Badi dalkiisii col dhacay baaqiga ugu dare
Nacab bogaadihaya aan bar caaqibaa lahayn
Allow ciiddayda boqranay lagaa badalo
Beesha kala dile illaahow lagaa bud dhigo
Allow kuwa sharaftii ka boqoolay kaa bannee
Dushaada allow ku beer wiilal loo baxsado
Allow aan duugga nacabkeennu kugu dakayn

BBC-jooge run ka bayre been daldale
Abidkiba buuqe aan lillaahi soo bandhigin
Niman diloo booboo aan xataa agoonta bixin
Oo buulashoodii ku jirra ay ka buubsadeen
Kan baahsha inay yihiin diinta rag u bambaxay
Isna umaan bogine rabiyouw lagaa badalo